# Guudmar





## Warbixinta Horumarka Aadanaha ee Soomaaliya 2012

### U Awoodsiinta Dhalinta ee Nabadda iy Horumarka

Soomaaliya waxa ay maraysaa xaalad kala guur ah iyada oo tabonaan sanadood oo ka mid ah iska-hor-imaadyadii ugu dabadheeraa, uguna kakanaa aduunyada ay qaabeeyeen kala duwanaanshihii ugu darraa ee wadanka. Gobolada koonfur-dhexe waxa ay soo mareen sannado badan oo dagaallo iyo sharci-la'aan ah, halka waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed ay ku guulaysteen waxoogaa nabad iyo degenaansho ah oo aan cago adag ku taagnayn. Kalaqaybintu waxa ay muujinaysaa waxa ka suurtogalka ah Soomaaliya, iyo sida ay tahay in wax loo qabto si ay dhammaan Soomaalidu cagta u saaraan waddada horumarka iyo nabadda. Waxaa loobaahan yahay aragti cusub oo xooggan, taas oo diiradda saraysa iskudhamaanshaha bulshada, halkaas oo ay dadku dareemaan lahaansho awoodeed, ayna haystaan awoodihii iyo fursadihii ay noolashoodu ku horumarin lahaayeen.

Si tan loo gaaro, isbedello cusub iyo rajo waxa ay ka imaan karaan aqoonsiga iyo ka faa'iidaysiga awoodda dhalinyarada Soomaaliyeed. Dhalinyaradu waxa ay ka midka yihiin kooxaha dhibta ugu darani kasoo gaartay taariikh dheer oo gooni u saarid ah. Sidoo kalana sanadahan, waxa ay noqdeen dadka ugu balaaran ee iskuxiran. Tani waxa ay keenaysaa fursado balaaran iyo dhibaatooyin xoog leh labadaba. Fursaduhu waxa ay ka imaan karaan iyada oo lasiiyo waxbarasho tayo leh iyo shaqooyin fiican, tusaale ahaan, iyada oo 'qaabka saamiga bulshada' lagu salaynayo faa'iidooyinka dhaqaalaha iyo isbedellada bulshada. Dhibaatadu waxa ay ka imaanaysaa marka hay'adaha waxbarashada iyo suuqyada shaqaaluhu ay ku guuldaraysataan ka jawaabiddda baahiyaha dahllinyarada – kadibna qaar ka mid ahi ay uleexdaan noocyada kala duwan ee rabshadaha ama qalalaasaha.

Iminka marka dib loo milicsado taariikhda dheer ee Soomaalida ee istaraatijiyadaha horumarinta iyo nabadaynta ee natiijooyinka kooban lagagaaray, waxaa cad in horumar arimahaas laga sameeyaa ilaa xad ku xiran yahay qorshe doonis balaaran oo ujeeddadiisu tahay samaynta isbedello/dhalan-rogasho. Dhinac muhiim ah oo arintani leedahay waa iyada oo dhallinyarada awoodaynteeda/awoodsiinteeda dhinaca wanaagsan udub dhexaad looga dhigo dhamaan yoolalka dhisidda-nabadda iyo horumarinka, iyo iyada oo horumarinteeda loo adeegsanayo isbedello lagu samaynayo siyaasadaha, mudnaanaha, iyo dibu-habaynta hay'adaha. Tani waxa ay u baahan tahay waxqabad ah heerar dhexe iyo heerar degaanba. Marka la eego tirada baaxadda leh ee dhalinyarada iyo waddaniyiinta dulman, waxaa loo baahan yahay in ladhiso sees adag oo dimuquraadiyad ah iyada oo loosii marayo farsamooyinka dhaqan gelinta waadaxnimada/xalaalmiirashada iyo laxisaabtanka si loo xakameeyo musuqmaasuqa, loo tirtiro faquuqidda, iyo in waliba hubanti laga dhigo in dadka codkooda lawada maqlo, waxqabashadeeda/ jawaab bixinteeduna ay noqoto mid ka timaadda dhinac walba (heer degaan iyo mid dawlad dhexe). Sidoo kale istaraatijiyadaha ladagaalanka faqriga iyo dhisidda-nabadda ee ay bulshadu horseedka ka tahay, waa in ay yareeyaan sinaan la'aanshaha dhinacyada bulshada, dhaqaalaha iyo awoodayntaaa siyaasadda ee keena carooyinka, sababana iska-hor imaadyo.

Bulsho weeynta caalamku dedaalo badan ayay ugashay in ay daneeyayaasha Soomaalida ah gacanta isqabsadaan si Soomaaliya nabad iyo xasilooni loogu soo dabaalo. Haseyeeshee waxaa fashilmay shan iyo toban shir nabadeed oo loo hanweynaa. Taas waxaa barbar socday iyada oo Soomaaliland ka goosatay Soomaaliya, madaxbanaanina ku dhawaaqday 1991, halka Puntland bay noqotay dawlad goboleed madaxbannaan oo ka mid ah dawlad Soomaaliyeed oo federal ah 1998. Labadaas gobol waxa ay abuureen degenaansho ku yimid xalinta khilaafaadyada ee gunta hoose laga soo bilaabay iyada oo mar walba diiradda lasaarayay xallinta dhibaatooyinka ee heer bulsho.

Laakiin iska hor-imaadyadu waxay noqdeen kuwo kasii socda koonfur-dhexe Soomaaliya. Hal arrin oo loo aanaynayo guuldarooyinkaas dibu-heshiintu laga bixiyay waa iyada oo geedisocodka nabadda ee dib-udhisidda qaranka iyo awood qaybsiga laga soo bilaabay xagga sare. Nidaamkani ma aha mid weli guulaystay, sababta oo ah ma aha mid saldhigiisu yahay bulsha weeynta. Su'aalaha aasaasiga ah ee kusaabsan nooca dawlad Soomaaliyaeed iyo sidii si cadaalad ah loogu maamuli lahaa isu dheelitirka iyo qaybinta kharaadka ee aan hore waxba looga qaban, maadaama ay yihiin kuwa asalka u ah iska hor-imaadyada. Kuwan waxaa ku xeeran arimo siyaasadeed oo ay ka mid yihiin fashilaaddii ku timid ismaamulka iyo raadadkii qalalaasayaashii hore u dhacay; horumar la'aan, dhaqaalaha fadhiidka ah iyo faqriga dabo-dheeraaday; sinnaan la'aanta ka dhex jirta kooxaha bulshada ee heerarka kala duwan; kororka dhalinyarada ee bulshada; iyo ciriiriyada deegaanka/bay'ada ee sii kordhaya.

Dib-udhiska Qaranku waa muhiim, laakiin kuma suurtogaliyo jawi ay ka jirto is-aaminid la'aani iyo kalasoocid baahday, iyo weliba iyada oo aan lala xaalayn cidda iskahor-imaadyada sababta u ah. Falanqaynta Soomaaliya waxa ay tilmaamaysaa in golayaasha siyaasadda ee Soomaaliya ay hareeyeen/buux-dhaafiyeen kala duduwanansho heer gobol ah laakiin iskusoo noqnoqonaya (ammaanka xadka), iyo ajandayaal heer caalami ah (burcad badeed iyo argagixiso). Ammaanka iyo xasiloonida dadka Soomaaliyeed oo laftigoodu bartilmaameed u ah inta badan xadgudubyada ayaa ah kuwo la iska fududaysto. Diiradda oo lasaaro maamulka iskahor-imaadyada – kuwaas oo awoodda lagu saarayo faa'iidooyinka xilliga dhow – waxa ay sababeen in la dhinac maro horumarkii gaari lahaa bulsho waynta Soomaaliyeed. Taasi waxa ay keentay in sinaan la'aanta sii kororto ayna sii shiddo iskahor-imaadyada.

Mamulidda xilliga dhow oo laga doorbido xilliga fog ee dhalan regiddu/isbedel samayntu sidoo kale waxa ay gargaarka horumarinta u riixdaa dhinaca gargaarka bani'adamnimo, inkasta oo arintan dambe sidoo kale ay waxtarkeeda leedahay, gaar ahaan marka la eego nidaamyada bixiya digniinaha hore iyo farsamooyinka qaybinta. Hal saamayn oo muuqatay waxa ay hayd dayacaadda dhinaca beeraha iyo khayraadyada dabiiciga ah ee degenaansha cuntada iyo hab nololeedku ku xiran yihiin. Tani waxa ay sii kordhisay halista gargaarka bani'aadamka ee degdegga ah, taas oo ay tusaale u tahay abaartii dhawayd ee sida lama filaanka ah u saamaysay Soomaaliya qaybtii dambe ee sannadka 2011.

In la fahmo iskuxirnaanta iskahor-imaadyada iyo horumarka Soomaalidu waa mid aad u adag, marka la eego kakanaanta iyo iskunoqnoqodka sababaha dhaliya iskahor-imaadka. Laakiin warbixintan Soomaaliya ee Horurmarka Aadanaha ee 2011, waxa ay ku doodaysaa in iskahor-imaadya, faqriga iyo horumar la'aanta midba midka kale dhidibada usii aaso, siina xoojiyo. Faragelinaha mustaqbalku waxa ay u baahan yihiin in ay noqdaan kuwo wax og, si weeyna u fahansan siyaasadda dhaqaalaha iyo isdhexgalka bulshada iyo saamaynta qabiilka. Tani waxa ay muhiim u tahay kor u qaadidda xaaladda horumarka Aadanaha.

## Horumarka Aadanaha ee Gaabiska ah

Horumarka aadamuhu waxa uu dadka ku qalabeeyaa/xoojiyaa awoodaha iyo fursadaha ay u baahan yihiin si ay u sameeyaan kaladoorashooyin ay nafahooda ku horumarinayaan. Marka laga eego dhinac walba oo horumarka aadanaha ah, Soomaaliya waxa ay dibudhac weeyn ka dhaxashay dagaaladii, sida ka muuqata cabiraadaha (indices) Warbixinta Caalamiga ah Horumarka Aadanaha. Iminka, dadka Soomaalidu, dhinaca horumarka iyo bani'aadamnimada waxa ay soo gelayaan heerka ugu hooseeya marka aduunyada oo dhan loo eego, sinaan la'aanta dhinacyada bulshada oo ahta sababta iskahor-imaadyaduna waa mid sii balaaranaysa. Macaluushii 2011 waxa ay si sii kordhaysa u muujinaysaa mustaqbal murugo leh, haddii aan habka loo waajahayo iskahor-imaadyada horumarintu aanu si weeyn isu bedelin.


Qiimaha Cabbirka Horumarka Aadanaha ee Soomaalida (HDI) wuxuu hoos u gaaray 0.285 (Lifaaq 2). Hadii ay jiri lahayd xog si caalami ah la isu barbardhigaa, Soomaalidu waxa ay ka mid noqon lahayd heerarka aduunka ugu hooseeya oo ah 165 marka loo eego 170 waddan sanadkii 2010 sida ku cad Warbixinta Horumarka Aadanaha. Taas waxaa dheer, haddii la xisaabiyo heerka sinaan la'aanta ee qaybinta dakhliga, waxbarashada iyo caafimaadka – oo ah seddexda dhinac ee uu ka kooxban yahay Cabirka/halbeegga Horumarka Aadamuhu (Human Development Index-HDI) — Soomaalida HDI geeda ayaaba ugu daran, kaas oo khasaaraha celceliska ahi gaarayo 42 %, marka lagu cabiray Sinaan la'aanta la isku celceliya HDI (IHDI).

Sinaan la'aanshaha jinsigu waa mid aad u daran oo gaaraya 0.776 oo ah cabirka 1 (sinaan la'aan dhamaystiran), Xagga u hoosaysa marka laga soo tiriyo cabbirka sinaan la'aanta jinsigana ee aduunyada oo dhan Soomaalidu lambarka afraad ayay galaysaa – haddii ay jirto xog caalami ah oo la isbarbar dhigaa. Haweenka ka saaritaan/faqiiqidda iyo sinaan la'aan ayaa gaarsiisay dhibaato balaaran marka laga eego dhammaan cabbirada - caafimaadka, shaqaalaynta, iyo kaqaybgalka suuqa shaqaalaynta. Habalaha Soomaalida waxaa loo guuriyaa iyaga oo da'doodu aad u yar tahay, tacadiyada hablaha iyo haweenkuna waa mid aad u sii balaaranaysa. Xeerarka dhaqanka, ayaa beddela sharciga wadanka, kuwaas oo faquuqa haweenka. Gudniinka Fircooniga ahi waa mid saameeyay in qiyaas ahaan ka badan 98% haweenka. Inkasta oo ay jiraan siyaasadaha sinaanta jinsigu iyo shariciyo, tusaale ahaan, xadgudubyada iyo faquuqitaanka haweenka Soomaalidu waa mid sii jira si uu u caburiyo xuquuqaha haweenka, inta badanna cid looma ciqaabo.

Dhaqanka bulshada Soomaalida waxaa shardi u ah inaan laga hadlin shaqaaqooyinka qoyska iyo kufsiga kuwaas oo sii xagal daaciya sidii haweenku u heli lahaayeen cadaalad. Dedaalo badan oo geesinimo ku dheehan tahay oo ay haweenka Soomaaliyeed sameeyeen si ay dhaqankan uga hortagaan waxa ay noqdeeen kuwo la go'doomiyay ama muddo kooban sii jiray – welina way u dhiman tahay inay ku gulaystaan helitaanka dad badan oo ah kuwo go'aamadu ka go'aan si ay u sameeyaan isbedellada balaaran ee loo baahan yahay. Haweenka dhalinyarada ahi waxa ay ku dambeeyaan kuwo ku guuldaraysta dhamaan qaybaha nolosha – taas oo ah xaqiiq hortaagan xuquuqdooda iyo horumarkooda, sidoo kalana waxa ay sii cimri dheeraysaa meertada sinaan la'aanta ee jinsiga ku dhisan iyo faqriga oo laga dhigo mid si gaar ah dumarka wehel ula ah.

Marka laga hadlayo cabbiridda go'doominta la xiriira faqriga, Halbeegga dhinacyada badan ee faqriga ee Soomaaliya (MPI) oo ah 0.47 iyada oo halka ugu saraysaa tahay 1 – waxa uu ku dhici lahaa lambarka 94 ee 104 wadan sannadkii 2010 haddii isbarbardhig lagu samayn lahaa adduunyada oo dhan. Qiyaas ahaa 82% Soomaalida, waxaa loo aqoonsan yahay kuwo faqri ah marka la eego cabbirada dhinacyada badan (Jaantuuska 1). Qaybsanaanta u dhaxaysa reer magaalka iyo reer miyigu waa mid balaaran taas oo ah 61% iyo 94% sida ay u kala horeeyaan. Koonfur-dhexe Soomaaliya, 89% dadku waa faqiir/maxaysato dhamaan cabbirrada kala duwan, marka la barbar dhigo 75% Puntland iyo 72% Somaliland.

**Jaantuska 1aad: Saboolnimada & Celceliska Ba'naanta Wax-haysasho la'aanta oo loo kala saarey Gobol-gobol**




## Jiil balaaran oo banaanka la dhigay/ gooni loo saaray


Bulshada dhalinyarada ee Soomaalidu ma noqon doonto mid ay soo waajahdo wiiqmidi (yaraan) mustaqbalka la saadaalin karo sababta oo ah heerka dhalmada oo aad u sarreeya, taas oo lagu qiyaasay in haweenaydu ay samaynayso 6.2 dhalitaan o inta u dhaxaysa 2010 iyo 2015. In kabadan 70% Soomaalidu waa qaar ay da'doodu ka yar tahay 30; waxaana ay waajahaan iskahor-istaag sidii ay uga gudbi lahaayeen dhalinyaradanimada taas oo ay sababaan go'doominta dhinacyada bulshada, dhaqaalaha iyo

siyaasadda. Kuwaasi waxa ay la xiriiraan qabiil, dhaqan, jinsi (lab/dhadig), da'a, jahli, faqri iyo kuwo kale. Waxaana sii xoojiyay dabeecadaha baahsan ee bulshada iyo dhaqamada lugooyada ah, iyo rabshadaha sii socda. Kasaaritaanku wuxuu xaddidaa awoodaha iyo fursadaha, sidoo kalana wuxuu is-hortaagaa waxtarkii dhalinyaradu ku biirin lahaayeen dhisidda nabadda iyo horumarinta. Arintani sidoo kale waxa ay niyad jebisaa tamarta dabiiciga ah iyo doonitaanka dhalinyarada, waxaana ay si nidaamsan isuhortaagtaa horumarkooda wanaagsan.

Sahan la sameeyay markii la diyaarinayay Warbixinta Horumarka Aadanaha ee Soomaaliya 2012, shaqo la'aanta guud ahaan dadka da'doodu u dhaxayso 15 iyo 64 waxaa lagu qiyaaysay 54% Soomaliya dhexdeeda, ilaa 47% laga soo bilaabo 2002. Heerka shaqo la'aanta ee dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 14 ilaa 29 waa 67% taas oo ah mid ka mid ah heerarka aduunyada ugu sareeya. Dumarku waxa ay la kulmeen shaqo la'aan baahday oo ah 74%, halka raga shaqa la'aantoodu gaartay 61%. Inta badan shaqaalaha qooysaska ee lacag la'aanta ahi waa haween dhalinyaro ah kuwaas oo badanaaba lagu qasbo in ay qabtaan shaqooyinka dhaqanka ah oo kusalaysan doorarka jinsiga ee dhaqanka. Kaqaybgalka dhalinyarada ee shaqada muruqmaalnimada oo lagu qiyaasay 66%, waxa ay sii muujinaysaa fursadaha ka lumay kuwii dugsiyada dhigan lahaa ee heli lahaa xirfado iyo waxabrasho kor u qaadi kari lahaa waxsoosaarkooda mustaqbalka iyo xoogsigoodaba.

Sahanku wuxuu daboolka ka qaaday sida dhalinyarada Soomaalida ah ee da'doodu u dhaxayso 14 iyo 29 ay u waajahayaan culaysyo ka baajinaya ukala gudubka dugsiga iyo suuqa shaqada. In ku dhow 21% dhalinyaro 60 ah oo jawaabo bixiyay waxa ay ahaayeen kuwo shaqo iyo iskuul midna aan hayn. Saamiga dhalinyarada aan shaqayn, dugsi/iskuulana aan dhigan 50 waxa ay la korortay da'da, inkasta oo 40% dadka la waraysatay ee qaybtan hoos imanayay ay 40 ahaayeen shaqo doon firfircoon. Shaqo la'aantan ama kooxdan la niyad jebiyay waa ta ay soo waajahdo guuldarada ugu weyni, waana kuwo aad ugu nuqul in ay khatar 30 iyo dhaqamo dembiilenimo ku dhacaan. Saamigii dhalinyarada aan shaqaynayn, dugsina aan dhiganayn waxa uu ahaa in kabadan 20 waxaana la cadeeyay in 27% dumarka dhalinyarada ah ay yihiin, halka raga dhalinyarada ah ka yihiin 15% eeg (Muuqaalka 2). Marka dugsiga iyo da'da carruurta iyo dhalinyarada la iskuwada qaado, saami balaaran ayaan dhinacna ku xisaabsanayn - oo aan shaqayn, dugsina dhigan. Waxaa loo baahan yahay in loosameeyo istiraatijiyado dhalinyarada kooxdan hoos imaanaysa si kor loogu qaado dhexgalkooda suuqa shaqada ka hor inta aanay fal-dambiyeedyo gelin ama aanay kuluglahaan dabeecado halis ah.

**Jaantuska 2aad: Dhallinyrada aan Shaqeyn oo aan ku jirin Dugsiyada oo loo kala saarey Dheddig iyo Lab**





Waxyaabaha ugu muhiimsan faa'iidooyinka lagu heli karo jid ka duwan kii hore waxaa ka mid ah - dhisidda awoodda dhalinyarada iyo 'udhammaanshaha' kuwaas oo la fududaystay. Awoodda dhalinyarada waa in looga faa'iideeyaa isbedellada dhinaca wanaagsan ee Soomaaliya, haddii kale jiilalkani waxa ay caqabad ku noqon doonaan nabadda, xasiloonida iyo horumar waara. Horaba, dhalinyaradu waxa ay uga mid noqdeen jilayaasha iskahor-imaadyada iyaga oo qayb weeyn ka ah maleeshiyooyinka, dembiilayaasha hubaysan, oo ay ku jiraan Alshabaab. Fursado lumay, aqoonsi aan caddayn, iyo dareen xaqirid leh oo ku sii dhex faafaya dhalinyaro ku nool wadan aan dawladi ka jirin, iskahor-imaadyo rabshado leh iyo hoos u dhac dhaqaale waxa ay abuuraan goob dhallinyaradu isugu bedesho xagjir. Sabab taas la mid ah oo ku riixday dhalinyarada Soomaalidu in ay ku biiraan Al-Shabaab ayaa sidoo kale keentay in ay ku biiraan kooxaha jidadka wax ku dhaca. Dhisitaanka fursadaha ay dhalinyaradu bixiso iyo yaraynta dhibaatada ay keeni karaan – waa kuwo ku baaqaya waxqabad xoog ah oo degdeg ah, kaas oo laga bilaabayo qodobka awoodsiinta kaas oo dhalinyarada dhigaya xudunta dhisidda-nabadda iyo horumarka.

Kacdoonadii dhawaan ka dhacay wadamada Carabtu waxa ay muujiyeen sida awoodda dhalinyaradu horseed uga noqon karto isbedello siyaasadeed, gaar ahaan marka ay ka bilowdaan jaahwareer ka dhashay jiritaan la'aanta hab nololeedyada ama aan laga qayb gelin go'aamada iyaga saamaynaya. Soomaaliya, tayo darro waxbarasho iyo shaqo la'aani waa ilaha dareenka kumanaan dhalinyaro ah. Kuwa leh damac hogaamineed ama siyaasadeed waxaa sidoo kale lagu faquuqaa da'da, taas oo ay ku jirto caqabado sharciga ah. Markii ay waayeen fursado kale oo nololeed, qaar ka mid ah dhalinyaradu waxa sameeyeen istaraatiyado ay nolosha kuwaajahaan sida dhoof, halka kuwo kalana ku dambeeyaan burcad-badeed iyo argagixiso. Haddii xaqiiqadan la iskasii indho tiro, fashilaadaasi waxa u keenaysaa burbur balaaran Soomaalida, waxaana ay noqonaysaa meel ay ku barbaaraan kooxaha argagixisada adduunku.

Sahamin lagu sameeyay dhalinyarada oo qayb ka ahayd diyaarintii warbixintan waxaa loo isticmaalay in lagu qiyaaso heerka jaahwareerka dhalinyarada. Halbeegga jaahwareerka dhalinyarada waxaa loo isticmaalay in lagu cabbiro awood la'aanta dhalinyarada. Jawaab celiyayaasha waxaa la waydiiyay in cabbiraan fikradahooda kusaabsan sababaha keena jaahwareerka iyada oo la isticmaalayo halbeegyada 1 (xoog u diidan) ilaa 5 (xoog u ogol), oo leh darajo celcelis ah oo ka kooban sedexda gobol ee lagu muujiyay Muuqaalka 3. Cabbirka guud ee jaahwareerka Soomaaliya waxa uu noqday 3.96 marka loo eego cabbirka guud oo ah 5, iyada oo jaahwareerka ugu weeyni ka jiro Koonfur-dhexe kaas oo ah 4.3, marka labarbar dhigo aagagga waqooyiga oo ah 3.7. Dhammaan gobolada koonfur-dhexe Soomaaliya marka la eego waxyaalaha sababa xasiloooni la'aanta dhalinyarada waxa ay gaareen heerka ugu sareeya. Dareenka dhalinyarada ee la xiriira weji-gabaxu/sharaf dhacu waxa uu ahaa ka ugu hooseeya, iyada oo fursad la'aanta shaqaduna noqota ta ugu saraysa. Cabiraadaha noocan oo kale ahi waxa ay ahayeen kuwo ka muuqda Somaliland and Puntland.

Layaab malaha in shaqo la'aantu noqoto arinta ugu saraysa ee sababta jaahwareerka dhalinyarada – marka la eego in 67% dhalinyaradu yihiin shaqo la'aan. Inta badan dhalinyaradu waxa ay doonayaan in ay wadanka dibadda ka baxaan si ay u helaan fursado hab nololeed oo tan ka duwan. Isu-dheelitir la'aanta waxbarashada iyo tabobarada la heli karo iyo xirfadaha dhab ahaan looga baahan yahay shaqadu waxa ay kusii adkaysanaysaa in ay noqdaan arrimaha dabada ka riixaya jaahwareerka/argagaxa dhawrka qaybood ah ee burburiyay dhaqaalihii Soomaalida, oo ay ku jiraan iskahor-imaadyada iyo xaalufinta deegaanka.

**Jaantuska 3aad: Niyadjabka dhallinta iyo waxa sababay**




Guulaha laga gaaro hoos u dhigidda heer shaqo la'aanta dhalinyarada ee aadka u sareeya, iyo shaqooyinka heerkoodu hooseeyo, iyo faqrigu, waxa ay ku xirnaan doonaan kala duwidda nidaamka iyo korinta dhaqaalaha iyada oo loo marayo siyaasado iyo baranaamijyo diiradda saaraya labada dhinaca ee baahida iyo saadka. Fikradaha isbedelaya iyo dabeecadaha ku saabsan shaqaalayntu waa in ay jawaabtan u noqdaan udub dhexaad – taas oo ay ku jiraan aragtida ah in dhalinyarada tahay wadaniyiinta heerka labaad (second-class citizens) taas ah inay helaan waayo-aragnimo sanado badan inta aanay masuuliyad qaadin. Aqoonsiga shaqo la'aanta dhalinyarada cid keli ahi lama tacaali karto haddii ay keli shaqayso – waana in la iskawada kaashadaa arintaas, waana in ay noqotaa mid si fiican ugu dhafan istaraatijiyadda lagu waajahayo qalalaasaha salka balaaran ee haysta dhaqaalaha Soomaalida.

Marka la eego halbeegga jaahwareerka dhalinyarada, qiyaasta hoosaysa ee dareenka sharaf rididda iyo iskukalsooni la'aantu waa kuwo muujinaya in dhalinyaradu weli rajo fiican ka qabaan mustaqbal iyada oo ay jiraan caqabado badani. Aragtida noocan ah waxaa laga xaqiijiyay seddexda gobolba - xitaa koonfur-dhexe Soomaliya, halkaas oo 80% dadka wax la waydiiyay ay muujiyeen in ay aad u rajo fiican yihiin ama rajadoodu iska fiican yihiin. Dhammaan dedaalada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee khuseeya dhisidda-nabadda iyo horumarku waa kuwa waxtarkooda intaas laga sii kordhin karo si loogaga faa'iidaysto meelmarinta higsiyada isbeddel ku yimaadda dhalinyarada iyo guud ahaanba Soomaalida.

## Siyaasado iyo Barnaamijyo isku dhamaystiran – oo xaqiiqo ah

Dhalinyarada Soomaalida oo si buuxda loogu madaxbanaaneeyo dhisidda-nabadda iyo horumarku waxa ay u baahan tahay siyaasad dhamaystiran iyo barnaamijyo lagu jiheeyo yaraynta faqriga, korinta dhaqaalaha, udhamaanshaha bulshada iyo siyaasadda. Inkasta oo ay jiraan culaysyo isasoo tarayo oo la xiriira in nidaamyo kusalaysan 'dhamaystirnaan' iyo 'iskudhafnaan' lagu waajaho dhalinyarada, haddana faraq weeyn ayaa u dhaxeeya waxa afka laga leeyahay iyo waxa xaqiiqada ah. Weli ma jiro qaab dhismeed habaysan oo loogu talogalay fahamka iyo waxkaqabashada arimaha isku murugsan ee dhalinyarada marka la eego isku-dhacyada hubaysan.

Hay'adaha caalamiga ah waxa ay dhalinyarada Soomaalida ku taageeraan barnaamijyo kala duwan, laakiin waa kuwo kala filiqsan oo si liidata la isugu dubariday. Waxaa jira barnaamijyo aad u kooban oo waxtar leh islamarkaana diiradda lagu saarayo dhalinyarada kuwaas oo laga tusaale qaadan karo lana sii balaarin karo. Barnaamijyada ku salaysan xuquuqaha waxa hareeyay oo ay diiradda saaraan badbaadinta, waxbarashada aasaasiga ah, hawlaha la xiriira maanka bulshada (psycho-social work) iyo u dooditaanka. Kuwaas waxaa raaco farogelinno la xiriira siyaasadda bulshada, sida barashada nabadda, taageerosiinta ururada dhalinyarada, iyo hal-abuuryo dhaqaale, oo ay ku jiraan tababar xirfadeedyo iyo arimaha shaqo abuuridda ee muddada gaaban. Barnaamijyada shaqo abuuritaanku waxa ay ku xiran yihiin wixii la hayo, bixin tabobar iyo xirfado kobcin, muhiimad weeyna lama siiyo dhinaca baahiyaha sida barnaamijyada howlaha guud iyo maalgelinta meherado yaryar oo kobca, shaqo-isu-abuuritaan, ama mashruucyada ganacsi abuuritaanka ah. Way yar yihiin markhaatiyada muujinaya istaraatijiyadaha ugu wanaagsan oo ah macluumaadka muhiimka u ah baahinta iyo kor u qaadidda iyo doorashada meelaha ugu waxtarka badan ee laga geli karo.

Calaamadaha jira ee dhiirigelinta xambaarsan waxaa ka mid ah siyaasadaha dhalinyarada heer-qaran ee ay dhawaan ansixiyeen Soomaaliland iyo Puntland iyo dedaalka dawladda ku meelgaarku ugu jirto dejinta siyaadda dhalinyarada ee heer qaran. Kuwaasi waxa ay noqonayaan qaabdhimeed dhamaystiran. Laakiin saamayntoodu waxa ay si weeyn ugu xirnaan doontaa sida loogu dhex daro istaraatijiyadda horumarinta qaranka iyo siyaasadda waaxaha si loo mideeyo waxqabadka, dhaqaalaha loo qoondeeyay, iyo ilaa xadka dhalinyaradu ku lugyeelanayaan qorshaynta mustaqbalka, fulinta, iyo dabogalka.

Si gacan loo siiyo arimahaas iyo dedaalada kale ee muuqda ee ay samaynayaa, loona samaynayo dhalinyarada, Warbixinta Horumarka Aadanaha ee Soomaaliya ee 2012, waxa ay soo bandhigaysaa qaabdhismeed iskudhamaystiran oo siyaasadeed iyo barnaamij ay xudun u yihiin dhalinyarada oo loo arkayo hay'ad wanaagsan oo isbedel-samayneed. Tani waxa ay iswaafajinaysaa sedexda istraatiyadood ee caadiga ah ee kala ah ta xuquuqda kusalaysan, ta dhaqaalaha iyo siyaasadda bulshada kuwaas leh hal yool ama bartilmaameed oo keliya. Kuwaas waxaa ku jira awoodaynta/awoodsiinta dhalinyarada si ay si dhamaystiran ugu kobciyaan awoodooda oo dhan, ayna fikradahooda ugu cabiri karaan si xor ah, iyo in la ixtiraamo aragtiyadooda, iyo in ay ku noolaadaan nolol xor ka ah faqri, takoor iyo fadqalallo.

Awoodayntu/awoodsiintu waxa ay muujinaysaa aqoonsiga in dhalinyaradu leedahay baahiyo u gaar ah, dano, awoodo aan laga faa'iidaysan, xitaa dadka dhalinyarada ah ee halista ugu jira in ay ku lugyeeshaan iskahor-imaadyada. Kooxaha bah-wadaagta ku ah istaraatijiyada ee ay ka midka yihiin dadka waaweeyn, ganacsiga gaarka, ururada bulshada iyo dawladdu waxa ay u baahan yihiin in ay si wadajir ah oo iskudhafan dhalinyarada u siiyaan adeegyo dhamaystiran oo xeel dheer si ay u balaariyaan awoodahooda bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed iyo fursadaha shaqsiga ah iyo kuwa heer bulshaba.

Warbixintu waxa ay soo bandhigaysaa mabaadi'da hagaysa iyo istaraatijiyadda hogaaminaysa qaabaynta barnaamij dhalinyaro oo iskudhan, isla markaana diiradda saaraya arrimaha ubucda u ah awood-siinta sida kor uqaadida shaqaalaynta iyada oo la dhisayo hanti iyo awoodo iyo shaqo abuuritaan waara/dabodheeraada iyada oo loo marayo istaraatijiyadaha kusalaysan koritaanka shaqaalayntu hogaaminayso iyo dhiirigelinta abuuritaanka ganacsiga ee dhalinyarada. Farogelimaha dhinac walba sida shaqaalaynta, iyo adeegyada shaqo qoritaanka, dhisidda awoodda ururrada, codka iyo wakiilnimda dhalinyarada iyo badbaadinta deegaanka, iyo sinaanshaha waa in dhamaantood lagu kulmiyaa barnaamijka dhalinyarada maadaama ay fududaynayaan awood dhisitaanka. Doodahaasi waxa ay bixinayaan waxqabadyo balaaran oo suurtogal ah iyo faragelimo iyo arrimaha furaha u ah ee sameeya waxqabadyada xaqiiqada ku dhisan ee ugu wanaagsan horumarinta dhalinyarada iyo awoodsiintooda. Looguma talogelin in ay xal u noqdaan caqabad iyo dhibaato walba oo soo waajahda horumarinta dhalinyarada, laakiin waxa ay bar bilow u noqon kartaa istaraatijiyadaha dhalan-rogga ee lagaga gudbayo nidaamyada hadda ee badiba ah kumeelgaarka iyo daryeelka.

Abuuritaanka iyo taageeridda ururo dhalinyaro, wacyi gelin bulsho iyo dhisidda awoodaha ururadu waa in ay aasaas u noqdaan barnaamijyada noocaas ah. Bixinta waxqabad kooxeedyo ay ku jiraan cayaaro, u adeegid bulsho, waxbarasho, xirfado iyo abuuritaan ganacsi waxa ay horseedi karaan tilmaamo fiican, awoodsiin kooxeed, koox-wadashaqayneed iyo xirfado hogaamiyenimo. Horumarinta ay horseedka ka tahay bulshadau waa mid ka mid ah istaraatijiyadaha ugu wanaagsan ee bulshooyinka awooddooda dhista taas oo u suuurtogelisa in ay toos u go'aamiyaan arimaha maalgelinta iyo qorshaynta iyo fulinta mashruucyada; waxaana ay dariiqa u xaari kartaa wax soosaarid cusub oo horumarineed iyo barnaamijyo nabad-dhisideed oo ay horseed ka yihiin dhalinyaradu.

Marka la eego iskuxirnaanta ka dhaxaysa nabadda iyo horumarka, qaabdhismeed dhamaystiran oo dhalinyaradu leedahay waxa uu u baahanayaa wadashaqayn adag oo u dhaxaysa jilayaasha ka shaqaynaya horumarinta iyo dhisidda-nabadda. Hawsha horumarintu waxa ay u baahan tahay in si firfircoon loola mideeyo dhisidda-nabadda halka ay ta dambe u baahan tahay in lagu daro talaabooyin ay ka mid yihiin kuwo dhaqaale si loogu guulaysto horumar waara iyo nabad joogto ah. Labadubana waa in ay ku dedaalaan awood-siinta iyada oo loo marayo isbedel/dhalan-rogitaan.

## Ajandaha dibuhabaynta isbedel firfircoon

Si awoodda iyo firfircoonida dhalinyaradu udub dhexaad ugu noqoto horumarka iyo dhisidda-nabadda, Warxbixinta Horumarka Aadanaha 2012 ee Soomaalidu waxa ay soo bandhigaysaa qorshe isbedel firfircoon oo ka kooban sagaal qodob. Iyada oo lagu salaynayo baahida loo qabo in mashruucyada go'doonka ah looga gudbo kuwo iskudhamaystiran, maamulitaanka iskudhacyada looga talaabsado kagudbid iskudhacyo, ayay hadana kuxisaabtamaysaa casharradii laga bartay horumarkii gaabiska ahaa ee laga sameeyay Soomaaliya 20 kii sano ee lasoo dhaafay. Sidoo kale iyada oo ka shidaal qaadanaysa niyadsamida istaraatijiyadaha waxqabad ee heer caalami iyo heer goboleed ee ku jihaysan dhalinyarada, gaar ahaan Barnaamijka Caalamiga ah ee Waxqabadka Dhalinyarada, Qorshaha toban sanadoodlaha ah ee Dhalinayarada Afrika 2009-2018 iyo Qaabdhismeedka Istraatijiyadda Horumarineed Kooxeedka ee Qaramada Midoobay iyo mudnaanaha barnaamijyada waxqabadyada wadajirka ah ee la dejiyay iyada oo laga jawaabayo caqabadaha muhiimka ah ee xagga horumarka ee ka dhashay dhaqdhaqaaqyada siyaasadda ee wadammada Carabta

Aasaaska/seeska fulinta ajendahan dibu-habayntu waa mabaadi'da hagaysa in awoodaynta/awoodsiinta dhalinayradu tahay masuuliyad lawadaago, taas oo ay si micno leh u dardar gelin karaan daneeyayaasha arinta furaha u ahi sida dawladda, hay'adaha Qaramada Midoobay, bulshada rayadka ah, ururada aan dawliga ahayn, ganacsiga gaarka loo leeyahay, qurba-joogta, ururada dhalinyarada oo wadashaqeeya, mideeyaana dedaalkooda si ay u dhisaan awoodda dadkooda dhalinyarada ah, si ay barnaamijyadooda u waafajiyaan qaabdhismeedka guud ee siyaasadda dhalinyarada iyo qorshe waxqabad, isla markaana aragtiyada/fikradaha dhalinyarada ay ku daraan barnaamijyadooda iyo waxqabadyadooda.



Awoodayn/awoodsiinta dhalinyaradu waa masuuliyada ay wada leeyihiin: Xukuumadda, bulshada rayadka ah, ganacsiga gaarka ah, qurbajoogta iyo bulshada caalamkuba – mid walibana door ayuu ka ciyaaraa.

© UNDP Photo/Alistair Lyne© UNDP Photo/Alistair Lyne

## Qorshuhu wuxuu ku baaqayaa:

In awoodsiinta laga dhigo xuddunta qorshayaasha horumarinta qaranka: Tani waxa ay u baahan tahay in caqabadaha siyaasadeed iyo kuwa kale ee habaysan ee horseedka ka ah go'doominta iyo xaqiraadda dhalinyarada iyo in la abuuro, lana taageero xaalado dhalinyarada u sahlaya in ay yeeshaan tamar, awood, hay'ad iyo fursado ay kala

doorasho ugu samayn karaan nafahooda iyo dadka kaleba. Qaabdhismeed siyaasadeed dhalinyaro oo heer qaran ahi waxa uu u baahan yahay in si dhamaystiran loogu dhafo istaraatijiyadda horumarinta qaranka, loona beddelo waxqabad. Waa in dhammaan hay'adaha caalamiga ah ee gargaarku ay ku heshiiyaan barnaamij wadajir ah oo loogu talogalay dhalinyarada – kaas oo ku jihaysan qorshe midaysan oo dhalinyaro oo horseed ka noqda isbedel/ isdhalan-rogitaan.

Xoojinta Ismaamulka Dimuqraadiga ah: Tani waxay muhiim u tahay balanqaadka xuquuqda siyaasadda, badbaadinta xoriyadaha dhaqaalaha, in hay'aduhu noqdaan kuwo lala xisaabtamo iyo in la abuuro jawi ay nabadda iyo horumarku ku barbaaraan. Dhawr nooc oo dibu-habayn ah ayaa lagama maarmaan ah, iyada oo laga bilaabayo dibu-eegidda awood-qaybsiga ku salaysan qabiilka ee 4.5 (Cutubka 2, Sanduuqa 2.4), kaas oo ay tahay in laga dhigo mid dimuquraadiyadda aad ugu dhow isaga oo qayb ka ah dhisid qaran iyo geedisocodka dibu-heshiisiinta. Si hubanti looga dhigo in wakiilnimada iyo codka dhalinyarada ee nolosha siyaasadda, waxkabedelada dastuurka iyo talaabooyinka dibuhabayntu waxa ay meesha ka saari karaan carqaladaha dhinaca da'da ee hortaagan in doorasho loo tartamo iyo dhamaanba heerarka kala duwan ee dawladda.

Awoodda iyo khayradka oo loo daadejiyo heer gobol iyo heer degmo iyo horumarinta awoodaha si loo bixiyo adeegyo dadweyne oo si habboon loo mamulay, loona dhan yahay iyo maamul waxa ay shaqsiyaadka u abuuraan jawi ay ku dareemaan badbaadin, ururada bulshada rayadka ah, iyo ururada bulshadu waxa ay awoodaan inay ku badhaadhaan, hay'adaha xukuumadduna waxa ay noqdaan kuwo si dhow loola xisaabtamo. Ixtiraam loo hayo xuquuqda Aadanaha iyo sharcigu waxa ay u baahan karaan kabid lagu sameeyo sharciga, xoojinta hay'adaha sharciga, kor u qaadidda tabobarada xuquuqda Aadanaha iyo samaynta hay'ado xuquuqul insaan oo ah heer qaran, dhexdhexaad, la iskuna hallayn karo oo ay sii xoojiyaan ururada aan dawliga ahayn, ee wadaniga ee xuquuqda aadamuhu.


Tabobar xirfadeedka dhalinyarada waxaa laga dhigi karaa mid ka jawaaba xirfadaha shaqo ee xilligaas lajoogo suuqa looga baahan yahay. © UNDP Photo/Alistair Lyne.

© UNDP Photo/Alistair Lyne

Kor uqaadidda iyo wakiilnimada dhalinyarada: Awoodaynta dhalinyaradu suurtogal ma aha hadii aanu jirin damaanad qaad xuquuqdooda ka qaybgalka go'aamada dawladda ee heer walba. Heshiis kasta oo aan dhamaystirnayn waa in laga digtoonaadaa, dhalinyaradana waa in loo arkaa in ay qayb ka yihiin go'aan qaadashada si ay usoo bandhigaan fikradahooda, ayna soo kordhiyaan arimaha la xiriira dhalinyarada iyo ka badanba. Maadaama hay'adaha dhinaca farsamada ee ku habooni ay hubin karaan ka wakiil ahaanshaha dhalinyarada, waa in arimahaas si weeyn loogu iftiimiyaa qaabdhismeed siyaasadda heer qaran ee dhalinyarada.

Ururro dhalinyaro oo heer deegaan oo iskuxiran, islamarkaana xooggani waxa ay lagama maarmaan u yihiin kaqaybgal sal balaaran oo dhalinyarada ah. Kaqaybgalka golayaasha go'aan-qaadashada heer qaran waxa ay ku imaan karaan iyada oo la abuuro gole joogto oo dhalinyaro heer qaran ah iyo iyada oo hubinta laga dhigo wakiilo ku filani ay dhalinyaradu uga wakiil noqdaan iskudubarididda siyaasadda dhalinyarada ee heer qaran iyo guddi ka kooban xukuumadda iyo daneeyayaasha kale oo arintan dabogal ku sameeya. Iskuxirnaan adag oo ka dhaxaysa heerarka dawladda oo dhan, mid deegaan ilaa mid qaran, waa in la horumariyaa, waana in la gaarsiiyaa heer caalami halkaas oo laballan qaaday in awoodda la saaro iskuxirnaan, isdhaafsi aqooneed iyo waayo-aragnimo.

Kor u qaadidda shaqaalaynta dadka dhalinyarada ah: Tabobarada xirfadaha, adeegyada shaqaalaha oo laga dhigo kuwo la heli karo, la awoodi karo, haboon, tayadooduna aad u saraysa waa inay ahaadaan arrimaha lama huraanka u ah siyaasad dhamaystiran si kor loogu qaado shaqaalaynta dadka dhalinyarada ah, iyada oo lagu xisaabtamayo iskuxirnaanta ka dhaxaysa shaqo la'aanta dhalinyarada iyo jaahwareerka. Siyaasadaha kale waa in ay suurtogeliyaan helitaanka waxbarasho hoose/dhexe iyo sare oo ah caalami, lacag la'aan, lehna tayo iyada oo diiradda lasaarayo sidii fursado dheeraad ah loo siin lahaa kooxaha dibadda ka joogay, islamarkaana fiiro gaar ah la siinayo tayada barnaamijyada horumarinta ee xilliga hore ee caruurnimada.

Barnaamijyo salbalaaran oo lagu baranayo xirfadaha waa in ay ku jiraan dhaqaalaha guriga, waxbarashada aasaasiga ah, farsamada gacanta si loo daboolo baahiyaha kala duwan ee dadka dhalinyarada ah, loogana jawaabo baahiyaha suuqa ee taagan. Taageerooyinka kale oo muhiim ahi waxa ay ka iman karaan shaqo raadinta iyo meelaynta, hawlaha shaqo abuurashada iyo fursadaha shaqo ku tabobarasho. Sanduuqa Horumarinta Awoodda Dhalinyarada ee Heer Qaran waxaa samayn kara, maamulina kara golaha dhalinyarada ee qaranka si ay dhalinyarada dhaqaale kale oo dheeraad ah uguga raadiyaan xukuumadda, deeq-bixiyayaasha/hay'adaha caawimadaha bixiya, ganacsiga gaarka loo leeyahay, qurba-joogta iyo ururada caalamiga ah ee wax caawiya. Qayb ka mid ah maalgelinta waxaa toos loosoo mariyaa ururada bulshada si ay ugu noqoto faroqabsi ama lacag wareegta oo loo isticmaalo mashruucyada ganacsiyada yaryar si loo horumariyo waxsoosaarka ganacsiga dhalinyarada.

Horumarinta Koritaan loo dhan yahay oo shaqaalaynta hormuud ka tahay: Shaqo la'aanta baahsan ee dhalinyarada waxba lagama qaban karo hadii keligeeda dhinac looga saaro dhibaatooyinka kale ee soo foodsaaray dhaqaalaha Soomaalida. Abuuritaanka shaqaalayn waarta iyo kor uqaadidda shaqaalaynta dhalinyaradu waa in ay noqdaan qaybaha ugu muhiimsan istaraatijyad kasta oo dhaqaale kobcineed oo diiradda lagu saarayo arintan labada dhinac ah ee bixinta shaqooyin wanaagsan iyo xoojinta awoodaha horumarineed waaxaha dawliga ah iyo kuwa gaarka

loo leeyahayba. Siyaasadaha dhaqaale waa in lagu saleeyaa kor uqaadidda awoodaynta dhalinyarada si loo gaaro koritaan dhaqaale oo loo dhan yahay, dadka faqiirka ahina ka faa'iidaysanayaan, lagana digtoonaado kororka shaqo la'aanta, cod la'aanta iyo mustaqbal la'aanta. Waa in ay diiradda saaraan sidii dabarka looga jari lahaa awoodaha waaxaha ay aadka ugu dhowdahay in ay abuuraan shaqooyin, yareeyaan faqriga, gaar ahaan kuwa waafaqsan xirfadaha, danaha iyo waayo-aragnoomiyinka dadka dhalinyarada ah.

Sharciyayn qaran oo fiican kuna salaysan heerarka shaqaalaha caalamiga iyo maamul wanaagga suuqa shaqaaluhu waa in ay taageeraan koritaanka, xuquuqaha iyo tayada shaqaalaynta. Siyaasadaha iyo barnaamijyada firfircoon ee suuqa shaqaaluhu waa in ay baltilmaameedsadaan dhalinyarada, iyaga oo si taxadar leh u baahiyaha iyo saadka (supply) ee shaqaalaynta gudaha. Xukuumadaha oo latashanaya ururrada loo shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha, waxa ay u baahan tahay in ay abuurto maacluumaad ku saabsan suuqa shaqaalaynta iyo farsamooyinkii lagu dabogeli lahaa si loo hubiyo habsami u socodka macluumaad kusaabsan shaqaalaynta dhalinyarada. Marka lagu xisaabtamo awoodda kooaban ee suuqa shaqaalaba ee tooska ah, si loo daboolo baahiyaha shaqaalayneed ee sii kordhaya ee dhalinyarada, dhinac kale oo muhiim ah wuxuu noqonayaa shaqsiga oo isagu naftiisa shaqo u abuura, laakiin islamarkaana, tabobarada kusalaysan baahiyuhu waxa ay run ahaantii dhalinyarada ka caawin karaan in ay helaan fursado shaqaalayneed oo toos ah.

Deegaamaynta Higsiyada Horumarinta kunka-sano (MDGs) ee kusalaysan horumarinta iyo dhisidda-nabadda: Koobnaanta nidaamyada xagga sare laga soo bilaabo si loo mideeyo nabadda iyo soo kabashada dhaqaalaha Soomaaliya waxa ay tilmaamayaan ajande/qorshe cusub oo hoos lagasoo bilaabo kaas oo deegaamaynaya nabadda iyo horumarinta iyada oo loo arkayo in dhalinyaraduna ay ka yihiin qayb firfircoon iyo hay'ad dhalin karta isbedel habboon. Tan waxaa looga jeedaa in nabadda ka midka ah istaraatijiyadda horumarinta waddanka ee ay hagayso deegaamaynta MDGs ay tahay mid dhalinyaradu xuddun u tahay. Maadaama nidaam bulshadu saldhig u tahay oo horumarineed iyo nabad-dhisideed ay ku haboon yihiin hab-nololeedka dhalinyarada iyo awoodayntooda, waxa ay dhali karaan saamiyo waxtar leh iyaga oo awood siinaya bulshooyinka deegaanka, horseedayana koritaanka kaqaybgalka dhalinyarada. Sidoo kalana, kuluglahaanshaha bulshadu ma xallin karo arrimaha qaab-dhismeedka haddii aan awoodaha iyo khayraadkaba la daadejin hoos.

Dhinaca dhisidda-nabadda, habka caadiga ah ee maamulidda khilaafaadka ee xagga sare lagasoo bilaabaa waxa uu u baahan yahay awoodo iyo aragtiyo cusub oo nabadda ah taas oo awoodeedu tahay heer deegaan, ayna hormuud ka yihiin ururada bulshada ee ay dhalinyaradu hogaamisaa. Waxa ay ku baaqaysaa in la isukeeno qaybaha istaraatiyad wadaagga ah oo ay ku jiraan xukuumadda, ganacsiga gaarka ah iyo ururrada bulshada si ay wadajir ahaan dhalinyarada ugu suurtogeliyaan helitaan dhamaystiran, si fiican loo maamulay oo ah adeegyada iyo alaabooyinka (products) ay u baahan yihiin si ay u balaariyaan awoodahooda bulsho, dhaqaale, siyaasadeed iyo furadahoodaba.



Waxqabadyada/farogelimaha oo dhami waa in ay higsadaan waxka bedelka arimaha jinsiga iyada oo loo marayo waxqabadyo ku salaysan istaraatijiyad meesha ka saarta sinaan la'aanta dhinaca awoodaha ee u dhaxaysa ragga iyo haweenka.

© UNDP Photo/Alistair Lyne

'Dhalinta' horumarka iyo dhisidda-nabadda: Horumarka iyo nabad-dhisiddu, haddii aan la dhalin, waa kuwo halis ku jira. Haweenka, gaar ahaan kuwa dhalinyarada ahi, waxa ay u baahan yihiin in ay xuddun u noqdaan ajandaha siyaasadda wadanka – iyada oo talaabooyinka sinaanshaha jinsiga (lab/dhadig) lagu dhex-dhafayo hal-abuur kasta/waxqabad kasta. Maadama fadqalalooyinka ku salaysan jinsigu iyo takoorku ay yihiin kuwo aad ugu baahsan bulshada Soomaalida, dhalinta horumarka iyo nabad-dhisiddu waxa ay ku baaqayaan ka hortegitaanka caqabadaha jira iyada oo loo marayo siyaasad iyo qorshayn. Tani waa arin farsamo iyo mid siyaasadeed labadaba, waxaana ay u baahan tahay in isbedello la taaban karo lagu sameeyo dhaqamada ururrada, hababka loo fekero, yoolalka, qaab-dhismeedyada maamulka, iyo qoondaynta khayraadka hay'adaha caalamiga ah, kuwa dawladda iyo kuwo ururada aan dawliga ahaynba.

Meesha ay suurtogalka ka tahay, barnaamijyada jinsigu waa in ay ahaadaan kuwo siyaalo kala gaar ah loogu bartilmaameedsado ragga iyo haweenka ka hor inta aan la dejin nidaam loowada dhan yahay. Iyada oo barnaamijyada jinsiga dhexda u ahi horeba usoo jiiteen hablo farobadan marka loo eego wiilasha, ayaa haddana waxaa dhici karta in siyaasado si wanaagsan loo dejiyay ay noqon karaan kuwo ka indho la' arrimaha jinsiga. Caddaymaha ka muuqda ururrada haweenka ee jira ee curyaaminaya haweenka dhalinyarada ahi waa kuwo arintan ka marag kacaya. Barnaamijyada lagu bartilmaameedsanayo jinsiga ee sida cad diiradda u saaraya haweenka dhalinyarada ahi waa kuwo lagama maarmaan u ah xaaladaha kala duwan ee ay habluhu waajahaan marka ay ka gudbayaan marxaladda dhalinyaranimada. Kor uqaadidda awoodaha dhalinyarada waa in loo maraa nidaam awoodsiinaya haweenka dhalinyarada ah, iyada oo xoogga lasaarayo baahiyahooda aasaasiga ah (sida iyaga oo laga yareeyo culaysyada shaqada ee guriga) kuwaas oo bar bilow u noqon kara waxkaqabashada habnololeedkooda waxsoosaar iyo baahiyahooda istaraatijiga ah (awoodsiin). Farogelimahaas oo dhan waa in ujeedadoodu ahaato isbedelaad lagu sameeyo jinsiga (gender transformation) iyada oo loo marayo waxqabadyo istaraatijiyad ku salaysan oo meesha ka saara sinaan la'aanta awoodaha ee ragga iyo haweenka. Dhisidda-awoodd xagga hoose lagasoo bilaabo abaabulkeedu, gaar ahaan, waxa ay keeni kartaa xorayn dabiici ah oo la joogtayn karo.

Hubinta Horumar Aadami oo deegaan/bay'o ahaan la joogtaynkaro: Hawlgaladii dhinaca bani'aadamnimada ee iskuxigay ee Soomaaliya waxba kama aanay qaban dhibaatada soo gaarta deegaanka/bay'ada, xitaa inkasta oo ay kuwaasi yihiin iminka kuwo soo shaacbaxaya in ay yihiin

ilo muhiim ah oo iskahor-imaadyada sii balaariya. Isbedelka cimiladu waxa uu ka dhigayaa bay'ada iyo bani'aadamka ku noolba kuwo aad u nugul, halisna gelinaya hab-nololeedyada iyo xasiloonida nafleyda.

Si hore loogu socdo, waa in waddanku leeyahay qorshe waxqabad oo muddo dheer oo ku saabsan maamulka khayraadka dabiiciga ah taas oo qaybka ka ah istaraatijiyadda waddanka ee horumarinta. Maadaama dhalinyaradu ay aad ugu baraarugsan tahay arimaha la xiriira deegaanka iyo qiimaha waaritaanka waqtiga fog, waxa ay qaadan karaan door hogaamineed oo ay ku jirto horseed ka noqoshada dhaqdhaqaaqyada bulshadu hogaamiso ee cagaarinta horumarka.



Fursadaha waxbarasho oo kor loo qaadaa waxa ay fure u tahay awoodaynta/awoodsiinta haweenka dhalinyarada ah ee ku nool Soomaaliya.
© UNDP photo

Qorshe kasta waa in ay ku jirtaa horumarinta nidaam daadejisanta oo ah tamarta waarta, maadaama qalalaasaha tamarta ee kor u socdaa uu dhabar jab ku noqonayo ladagaalanka faqriga iyo iskahor-imaadyada. Tani waa in ay noqotaa mid bulshadu saldhig u tahay, awooddana saaraysa yaraynta qiiqa hawada, islamarkaana jawaab ku haboon kabixinaysa isbedelka cimilada. Soomaaliya sidoo kale waxa ay u baahan tahay in ay si degdeg ah u qaabayso una filiso Qorshe laqabsi waxqabad oo heer qaran – kaas oo door dhexe siiya barnaamijyada laqabsiga ee bulshadu udub dhexaadka u tahay sida ka faa'iidaysiga biyaha roobka iyo maamulka daaqa iyo khayraadka dabiiciga ah. Lahaanshaha hantida ee kusalaysan bulshada ama heshiisyada khuseeya maamulka daaqu waxa ay gacan ka geeysan karaan wax kaqabashada arrimaha la xiriira xuquuqaha dhulka iyo iskudhacyda ka dhasha muddada haynta, waxaana ay keeni kartaa niyad sami wanaagsan oo ah in dhulka si hufan oo waarta loo maamulo.

Xoojinta Saldhigga Aqoonta: Dedaallada cilmi-baarisyada ah ee sii kordhaya, hirgelinta dhisidda-nabadda iyo horumarintu waxa ay wax dareensiiyaan/tusaan/baraan dadka siyaasad dejiya iyo kuwa horumarinta ku takhasusay ee aduunyada dacaladeeda ku nool. Haddii fikirkan oo ay ka jiraan doodo siyaasadeed oo waxtar leh lagu dabakho Soomaaliya waxaa loo baahan doonaa qorshe/ajande cilmi baadhiseed, iyo in lasii hagaajiso xogta qaranka iyo maragyo/cadaymo kusalaysan falanqayn.

Si loo sameeyo cilmi-baaris habaysan oo dhamaystiran oo ku saabsan dhalinyarada iyo quwadaha xiriirka ka dhexeeya iskahor-imaadyada iyo horumarinta, waxaa loo baahan yahay qaabayn iyo falanqayn salbalaaran oo heer qaran ah oo lagu sameeyo dhalinyarada halista ku jirta. Mudnaanaha kale waa in ay noqdaan sahamin si weeyn loogu eego halbeegyada nolosha heerka caadiga ah ee wadanka si loo fahmo dhinacyada kala duwan ee awoodaynta dhalinyarada, sinaanshaha, iyo waaritaanka. Xogaha ku salaysan gobol-gobolku waxa ay kordhin karaan fahamka sinaan la'aanta ee horseedda iskudhacyada iyo faqriga. Qeexitaanka cabiraado laqaadan karo oo ah qaybaha ka reeban iyo calaamadinta isdhexgalka ka dhexeeya ku jiritaanka iyo ka reebnaantu waa muhiim, maadaama uu yahay cabbir loo adeegsado awoodaynta khusaysa ka saaritaanka bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda, sidoo kalana waxaa lagu ogaadaa raadadkooda horumarinta iyo iskahor-imaadyada.

## Awoodaynta oo muhiimadda lasaaro

Iyada oo ah qaybta ugu muhiimsan horumarka Aadanaha, awoodayntu/awoodsiintu koow ayay ka tahay ajandaha halkan ku cad. Waxa ay leedahay awood isbedel oo ay isugu keeni karto in meesha laga saaro siyaasadda faquuqitaanka iyo carqaladaha nidaamsan iyada oo xagga sare lagasoo bilaabayo iyo hooska bilowga hawlaha ay bulshadu horseedka ka tahay ee awoodsiinta dhalinyarada ee dhinacyda bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha. Inta hawshaas lagu dhexjiro waxaa salka dhiganaysa dimuqraadiyadda, waxyaalaha dhaliya iskahor-imaadyada oo ay ku jiraan sinaan la'aanta bulshaduna meesha ayay ka baxayaan. Cid waliba waxa ay heli kartaa fursado cusub oo ay ku dhisato, kuna isticmaaho awoodo si ay horseed uga noqoto nolosha ay doorato, gacanna ay uga geysato abuuritaanka barwaaqo iyo mustaqbal nabadgelyo leh.

United Nations Development Programme
Somalia
Springette, Off Lower Kabete Road, Spring Valley,
Nairobi
Tel: + 254 20 4255000
Website: www.so.undp.org

*Empowered lives.*
*Resilient nations.*